Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya

Warbixin oo uu ka horjeediyey Golaha Ammaanka ee ku Saabsaneyd Soomaaliya

15-ka Maajo 2018

Gudddoomiye

Ugu horrayn ii ogolow in aan u hambalyada qaaliga ah la wadaago xubnaha Golaha iyo Soomaalida ku kala nool daafaha caalamka curashada bisha barakeysan ee Ramadaan, oo ah bil ku asteysan nabad, is-cafin iyo naxariis.

Dhacdooyinkii 48-kii saac ee la soo dhaafay ka dhacay Soomaaliya ayaa muujinaya xaaladda cakiran ee soo food saartay dadkeeda.

Waxaa maanta magaalada Muqdisho lagu soo gaba gabeeyay Shirweynaha Qaran ee Dastuurka, kaasi oo ah mid heersare ah oo ay ku muujiyeen ka go'naan adag oo ku aaddan dib u eegista dastuurka oo loo dhan yahay oo leh yoolal cad-cad oo la hiigsanayo. Tani waxay si fiican u xoojinaysaa sareynta sharciga, xasiloonida iyo horumarinta dib u heshiisiinta.

Waxaa maanta loo dabaal dagayaa sanadguuradii 75-aad ee ka soo wareegatay aas aaska ururka dhalinyarada Soomaaliyeed. Munaasabadaha xuska iyo damaashaadka ah ee ka dhacaya dalka ayaa muujinaya baahida iyo hamiga jiilka maanta ee dhalinyarada Soomaaliyeed, kuwaas oo intooda badan aan haysan waxbarasho iyo fursado shaqo, taasina ay keentay in ay dareemaan in la takooro.

Magaalada Baydhaba, madaxweynayaasha dowlad goboleedyada dalka ayaa isugu tegey shirka Golaha Iskaashiga dowlad goboleedyada, si ay ugu diyaar garoobaan la shaqeynta dowladda federaalka ee arrimaha muhiimka ah sida amniga, qeybsiga kheyraadka iyo dakhliga iyo xiriirka ay la leeyihiin saaxiibada Khaliijka.

Kooxda Iskudhafka ah ee dib u eegista howlaha Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay ayaa halkan kula kulmaya Saraakiisha Soomaaliyeed iyo kuwa caalamiga. Doodda ayaa diiradadda lagu saarey saameynta AMISOM ku yeelan karo qorshaha kumeel-gaarka ah ee amniga qaranka.

Magaalada Beledwayn, saaxiibadeena gar-gaarka bini'aadannimo waxay habeen walba la shaqaynayaan maamulka deegaanka iyo bulshada si ay wax uga qabtaan dhibaatooyinka masiibada ah ee daadadku u geysteen in ka badan 200,000 oo qof.

Sidoo kale deegaanka Tukaraq ee gobolka Sool ayaa waxaa isku horfadhiya ciidamo ka kala tirsan Somaliland iyo Puntland, iyadoo aan la ogeyn khasaaraha ka dhashay dagaalkaasi. Waxaa jirta khatar weyn oo ah in iskahorimaadkan uu sii xumaan karo oo saameyn xun ku yeelan karo dadka deegaanka iyo sidoo kale dhammaan Soomaalida.

Guddoomiye

Wax badan baa ka socda. Waxaa sharaf weyn leh in dhacdooyinka lama filaanka ah aysan Dowladda Federaalka ka weecin go'aankeeda ah in ay fuliso ajandayaal ay ka mid yihiin dib u habeynta dhaqaalaha iyo maaliyadda iyo dakhli-abuurka, dib-u-habeynta laamaha amniga, iyo siyaasadda loo dhan yahay, iyadoo dhammaan rajada laga qabo in la helo isbeddel rajada wanaagsan leh ee aan laga laaban karin ee dalka ka socda.

Ajandahani wuxuu Golaha iyo saaxiibada Soomaaliya ee caalamiga ka mudan yahay taageero waqtiyeysan oo joogto ah, iyadoo la ogsoon yahay in khataraha badan ee dalka soo food saaraya loo baahan yahay in la maareeyo lana yareeyo.

Dawladda waxay si xoog leh u raacday tallaabooyinkii lagu gaari laha hadafka ah in dalka la gaarsiiyo horumar dhaqaale iyo mid maaliyadeed. Bishii Febraayo Sanduuqa Lacagta Adduunka wuxuu soo dhaweeyay horumarka laga gaaray barnaamijka kormeerka shaqaalaha waxayna markale ballanqaadey taageeradeeda ay Soomaaliya uga caawiso sidii ay u gaari lahayd go'aan waddan sabool ah oo deyn badan lagu leeyahay sida ugu dhaqsaha badan.

Wareegii Heerkiisu Sarreeyey ee looga hadlayey arrinta Soomaaliya 19kii Abriil ee ka dhacay Washington DC ayaa furay waddada deeq bixinta deynta ka hor. Tani waxay ahayd codka kalsoonida maadaama ay dowladda Soomaaliya guul ka gaartay la-shaqeynta ganacsiyada gaarka loo leeyahay, hagaajinta maamulka maaliyadda guud iyo kordhinta dakhliga gudaha. Wadamo ka mid ah Saaxiibada Soomaaliya ayaa durba bixinaya ama hadda qorsheynaya inay kordhiyaan taageerada miisaaniyadda, oo ay ku jiraan EU, Norway, Sweden iyo Turkiga.

Dhaqaale badan ayaa loo baahan yahay si wax looga qabto sababaha asaasiga ah ee nuglaanshaha, saboolnimada daba dheeraatay iyo horumarka aadanaha oo hooseeya oo saameeya inta badan dadka. Maalgelin muddo dheer ayaa loo baahan yahay si loo dhiso u adkaysi loo yeesho jahawareerka cimilada, loogana jebiyo meertada xasaradaha soo noqnoqda ee sababa dhibaato badan oo wiiqaya geeddi-socodka dawlad-dhiska.

Xaaladda bini'aadannimada uma darna sidii sanad ka hor, laakiin marka lagu eego halbeeg kasta oo caalami ah, weli waa mid halis ah.

Roobabka Guga iyo fatahaadaha ayaa saameeyay in ka badan 718,000 oo qof oo ku nool gobollada dhexe iyo koonfurta Soomaaliya. Cawaaqibta ka dhalan karta fatahaadaha waxaa ka mid ah barakac bulsho oo aad u ballaaran, burbur dhaqaale iyo cudurro uu ka mid yahay daacuunka. Qorsheynta Falcelin-celinta Degdegga ah si wax looga qabto fatahaadda oo gaaraysa ilaa US$5.1 milyan ayaa la ansixiyay, waxayna sugaysaa oggolaanshaha kama dambaysta ah.

Qorshaha Ka Falcelinta Xaaladaha Bani'aadannimada ee 2018 wuxuu ku baaqayaa US$1.5 bilyan. Ilaa maantan la joogo, Qorshaha waxa la maalgeliyay 24 boqolkiiba kaliya, sidaas darteed, dhaqaalahaas kuma filna in la taageero hawlaha gurmadka fatahaadaha ee socda. Guddoomiye, ii ogolaw inaan ka faa'iidaysto fursadaan si aan uga codsado deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah mar labaad inay bixiyaan taageero deeqsinimo ah oo waqtigeeda ku habboon, anigoo uga mahadcelinaya dhaq-dhaqaaqa iyo dhaqaalaha aan horay loo arag ee suurtageliyay ka hortagga macluushii sannadkii hore.

Guddoomiye

Ku guuleysiga kor u qaadista dakhliga, helidda deeqaha iyo taageeridda miisaaniyadda waxay aas-aas adag u tahay ma ahan keliya maal-gashiga iyo abuurista shaqooyin balse sidoo kale waxay saldhig u tahay la tacaalidda caqabadaha amniga iyo dhismaha dowladnimada Soomaaliya, iyo xoojinta xiriirka dowlad goboleedyada, iyada oo loo marayo heshiisyada wadaagga kheyraadka iyo dakhliga.

Nabadgelyo darrada ayaa weli ah welwel joogto ah. In kastoo ay sii kordhayaan cadaadiska lagu haayo Al Shabaab, oo ay ku jiraan kor u kaca duqeymaha cirka, kooxda waxa ay weli sii wadaa in ay muujiso awoodda ay u leedahay in ay fuliso weeraro argagixiso oo lagu hoobto oo ka dhan ah bartilmaameedyada rayidka iyo kuwa millatariga oo ay ku jirto AMISOM, iyadoo si gaar ah u adeegsata qaraxyada.

Waxyaalaha sababa argagaxisanimada, oo ay ka mid yihiin shaqo la’aanta dhalinyarada, musuqmaasuqa, dareenka cadaalad-darrada iyo aanooyinka aan la xalin, way sii jirayaan ilaa waqti dheer. Caqabadda dhabta ah ee adag ee hortaala Soomaaliya iyo Midowga Afrika iyo saaxiibadeeda kale waa isku mar in lala dagaalamo fallaagada iyadoo dib u habeyn lagu sameynayo laamaha amniga.

Madaxweynaha ayaa hogaaminaya dib u habeynta difaaca. Dawladdu waxay qaadaysaa tillaabooyin geesinimo leh oo ay ka mid yihiin diiwaan-gelinta iyadoo la isticmaalayo habka suul-saarka, dib-u-habaynta mushaharka iyo qiimaynta u heegannimada howgal, iyadoo qiraysa in wax badan oo kale loo baahan yahay in la qabto.

Liiska uu Madaxweynuhu soo saaray waxaa ka mid ah, sida uu Ra’iisul Wasaaruhu u dhigay, in Naqshadda Amniga Qaranka laga dhigo dhisme, iyadoo la isku afgartay habka Ciidamada Maamul-goboleedyada loogu biirinaayo Ciidanka Xoogga Dalka iyo Booliska, iyadoo la meelmarinaayo sharciyada muhiimka ah, xisaabinta agabka iyo hantida iyo maamulka hubka, hababka wax iibsiga hufan iyo isla xisaabtanka cad.

Halbeegga horumarka ayaa ah in Qorshaha Ku-meelgaarka ee Amniga uu ansixiyay Golaha Wasiirada Soomaaliya 19kii Abriil. Qorshahan waxaa loogu talagalay in lagu dhiso awoodda hawl-fulinta iyo hay’adaha Soomaaliyeed ee aan ku koobnayn oo keliya ciidamada qalabka sida, balse dhinacyada amniga aasaasiga u ah bulshada, sida cadaaladda, maamulka dowladeed oo lala xisaabtami karo, xorriyadda dhaqdhaqaaqa iyo adeegga bixinta.

Qorshahan waxaa taageeray Guddiga Nabadda iyo Ammaanka Midowga Afrika 30-kii Abriil, waxaana soo dhaweeyay dhammaan saaxiibada howl-galka taageera Shirkii Amniga Heerkiisu Sareeyey ee ka dhacay Brussels 2-dii Maajo. Muhiimadu hadda waa in la hirgeliyo. Muhiimadu waxay noqon doontaa xaqiijinta lahaanshaha iyo hogaaminta qaranka ee qorshahan iyada oo loo marayo qaab-dhismeedka NSC, ee hoos imaanaya hoggaanka Soomaaliya.

AMISOM waxay sii waddaa inay ka ciyaarto door aan laga maarmi karin, sida ilaalinta goobaha dadweynaha, waddooyinka muhiimka ah ee saadka maro iyo horumarka guud ee siyaasadda Soomaaliya, iyagoo huray naftooda qaaliga ah. Ereyga Gaarka ee Midowga Afrika ayaa waxyar idin ka sheegi doona caqabadaha badan ee ku gadaaman.

Waxaa ku filan in la yiraahdo kala-guurka amniga guuleysta uma baahna kaliya dib u habeyn qoto dheer oo lagu sameeyo ciidamada Soomaaliya, laakiin sidoo kale, sida Ergooyinka Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika iyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ay xuseen, isbeddelka AMISOM, haddii ay la xiriirto hawlgallada wadajirka ah ee dabacsan iyo talo ka siinta arrimaha dagaalka, xoogga la saaro booliska, awood-bixiyeyaal ku filan oo xoog ku kordhiya ama hababka sarreeya ee isla xisaabtan, ha ahaato hanti ama ha noqoto mid la xiriirta xuquuqul insaanka. Taageero hawleed dabacsan oo ay bixiso UNSOS ayaa sidoo kale loo baahan doonaa, oo ay ku kaceyso qarash la saadaalin karo.

Dib u eegista wadajirka ah ee ay sameynayaan Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobey waxay u badan tahay in ay hoosta ka xariiqaan in shuruudaha ugu muhiimsan ee guusha ay tahay mideynta ujeedka ka dhexeeya madaxda Soomaaliyeed, iyo sidoo kale Soomaalida iyo Midowga Afrika, Wadamada Ciidamada ku Deeqey Howl-galka, iyo saaxiibada muhiimka ah ee qeyb ka ah howl-galka amniga. Habka Dhameystiran ee Qaab-dhismeedka Amniga waxaa loo naqshadeeyey si loo xaqiijiyo habab isku xiran oo la isku-duwan.

Guddoomiye

Siyaasadda Soomaaliya ayaa weli ah mid firfircoon sidii hore oo kale, iyadoo ay hareeyeen xasaradaha la xiriira tartanka loogu jiro kuraasta iyo kheyraadka, oo ay sii cakireen tabar darida hay'adaha Soomaaliyeed; madmadowga ku jira Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, gaar ahaan marka la eego xiriirka ka dhexeeya saddexda laan ee dowladda; dhibta sii kordhaysa ee la xiriirta qaabdhismeedka federaalka; iyo doorka lacagta aan la dabageli karin ku leedahay suuqa siyaasadda.

Khilaafka ugu weyn ayaa la xiriira saameynta khilaafka Khaliijka, doorka xildhibaanada ee siyaasadda, iyo xiriirka madaxda dowlad goboleedyada iyo dowladda Federaalka. Arrimahani way is-dul-saaran yihiin waxayna leeyihiin dhinacyo kala duwan.

Ismariwaagii u dhaxeeyay Xukuumadda iyo Baarlamaanka Federaalka ayaa la xaliyay horraantii bishii Abriil ka dib markii Guddoomiyahii Golaha Shacabka uu is casilay; Guddoomiye cusubna si nabad ah lagu doortay, lana caleema saaray todobaadkii hore. Tani waxay abuureysaa fursad lagu dardargelinayo ajandaha sharci dejinta, iyadoo laga faa'iideysanayo ifafaale naadir ku ah

siyaasadda Soomaaliya – oo ah wadajirka Madaxweynaha, Ra'iisul Wasaaraha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka.

Laakin si la mid ah xiisadaha sii socda ee u dhaxeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada, waxaa laga yaabaa in cilladaha ka jira qaabdhismeedka dowladnimo uu mar kale gacan ka geysto dhibaatooyinka mustaqbalka. Arrimahan oo ay ka mid yihiim sharciga doorashooyinka iyo sharciga xisbiyada siyaasadda ayaa u baahan in wax laga qabto, in loo gudbo madal dastuuri ah oo isu keenta dowladda federaalka iyo madaxda dowlad goboleedyada xubnaha ka ah federaalka iyo tallaabooyin lagu xakameynayo mooshinnada kalsooni kala noqoshada, iyo hannaanka xil ka qaadista iyo sidoo kale olole baaxadweyn oo lagula dagaalamayo musuqmaasuqa.

Doorka Qaramada Midoobay iyo beesha caalamku waxay sii ahaanaysaa inay ku adkaystaan u sareynta sharciga, arrimaha wadar ogolka ah, iyo in aan marnaba aqbali doonin isticmaalka rabshadaha ee qolo kasta u isticmaasho xallinta khilaafaadka siyaasadeed. Mararka qaarkood tani waxay keentaa in dhinacyada siyaasadda isku haya ay qolaba mar nagu eedeyso inaan u janjeerin dhinaca kale, balse waxaan aaminsanahay in taariikhda na xusi doono marka la eego taageerada joogtada ah ee isbeddelka tartiib-tartiibka ah ee hab-dhaqanka siyaasadda Soomaalida.

Xiriirka ka dhaxeeya siyaasiyiinta waaweyn ee Soomaalida ayaa lagu tijaabinayaa saameynta uu ku yeesho khilaafka dowladaha Khaliijka, iyadoo la ogyahay in siyaasiyiintaas ay dhinacyo kala duwan la safanayaan iyagoo ilaashanaya danahooda dhaqaale iyo yoolal siyaasadeed iyo mid amni.

Soomaaliya waxay u baahan tahay xiriir ku saleysan is-ixtiraam oo ay la yeelato dhammaan saaxiibadeeda caalamka, iyadoo la aqoonsan yahay in dowladda Federaalka ay xaq u leedahay hoggaaminta siyaasadda arrimaha dibadda, loona baahan yahay in dowlad goboleedyada lagala tashtoo haddii ay doonayaan inay taageeraan siyaasado saameyn gaar ah ku leh. Sida ugu habboon ee loo yarayn karo saamaynta khilaafka khaliijku waa in la helo Soomaalida oo mid ah.

Bulshada Soomaaliyeed ayay inta badan ku dhacdaa dhibta ka dhalata arrimahaas ay xal ka gaari waayeen saamileyda siyaasadda, ha lagu heshiiyo dib u eegista dastuurka ama ha lagu heshiisyo xal ku meel gaar ah.

Golaha Amniga Qaranka ee soo socda wuxuu fursad siinayaa in hoggaanka Madaxweynaha xal u helo arrimahaas. Khilaafka keeni kara hoos u dhaca qulqulka gargaarka iyo xiriirka dhaqaale, ama sii kordhinaya xiisadaha iyo khatarta rabshadaha hubeysan waxay kaliya faa’iido utahay kooxaha xagjirka ah waxayna dib u dhigayaan ajandihii dhisidda dowladnimada ee ay Soomaaliya dejisay si ay uga guulgaarto sanadaha soo socda.

Guddoomiye

Arrinta ku saabsan muranka ka taagan Tukaraq, wararka xaqiiqda waa la hubinayaa, balse dagaal ayaa qarxay, waxaana la soo sheegayaa inay jirto dhimasho iyo dhaawac.

Waxaan si buuxda u waafaqsanahay baaqii Madaxweyne Farmaajo uu jeediyey saacado ka hor ee ahaa in xabadda si degdeg ah loo joojiyo oo dib loo bilaabo wada hadal siyaasadeed ee u dhexeeya

madaxda "Somaliland" iyo Puntland. Maalmihii u dambeeyay, labada Madaxweyne, Biixi “Somaliland” iyo Madaxweyne Gaas Puntland, waxay ii xaqiijiyeen inay doonayaan inay ka fogaadaan oo aanay qaadi karin wax colaad. Soo dhawaada bisha Ramadaan ayaa ka dhigaysa xabbad-joojin muhiimad gaar ah. Filashada bisha Ramadaan ayaa xabbad-joojinta ka dhigaysa mid muhiimad gaar ah leh. Khatartu ma aha oo kaliya sida daryeel loogu heli karo boqollaal kun oo qof iyo suurtagalnimada barakac baahsan xilli gargaarka bini'aadannimada aad u yar yahay, balse sidoo kale saameyn xun ku yeelan karaa horumarka la taaban karo ee ay "Somaliland" iyo Puntland labaduba sameeyeen sannadihii la soo dhaafay. Dagaalku wuxuu burburin karaa heshiis nabad ku wada noolanshiyo ah oo jira in ka badan 20 sano.

Waxaan u soo jeedinayaa xubnaha Golahan inay la hadlaan cid kasta oo ay khusayso si loo yareeyo xiisadda loogana hortago kuwa laga yaabo inay ka faa'iidaystaan xaaladdan colaadeed.

Guddoomiye

Xiisadda Tukaraq waxay indhaha ka jeedin kartaa horumarka laga gaaray xalinta colaadaha meelo kale ka taagnaa, gaar ahaan Gaalkacyo oo maanta ka ammaan badan sanado hore, sidoo kale magaalada Marka, Shabeellaha Hoose, iyo Galmudug, oo ay jiraan jidgooyooyin badan hadana waxaa jira ifafaalo hor leh.

Dawladdu waxay ku sii socotaa hannaan dib-u-heshiisiin qaran, oo ay taageerayaan Qaramada Midoobey iyo saaxiibada beesha caalamka, iyadoo la aqoonsan yahay in colaadaha badan ee ka jira Soomaaliya, haddii laysku haysto kheyraad, khilaaf beeleed ama samaynta maamul goboleed, loo baahan yahay in laga faa’iidaysto ka qaybgalka bulshada rayidka ah, haweenka iyo ururada dhalinyarada, ganacsatada iyo sidoo kale odayaasha dhaqanka iyo khubarada dhexdhexaadiya khilaafaadka.

Guddoomiye

Nasiib darro, xaaladda xuquuqul insaanka ayaa ah mid aad u dhib badan, iyadoo kooxo badan ay si gaar ah ugu nugul yihiin kooxahaas oo ay ku jiraan haweenka, barakacayaasha, dadka laga tirada badan yahay, iyo saxafiyiinta.

Saxiixa Barnaamijka Wadajirka ah ee Xuquuqda Aadanaha ee bishii Febraayo waa tallaabo wanaagsan oo lagu xoojinayo habka ilaalinta Xuquuqul Insaanka. Waxaan u soo jeedinayaa Dowladda Federaalka in ay horay u sii waddo hannaanka lagu dhisayo Guddiga Xuquuqul Insaanka.

Xaaladda carruurta ay saameeyeen iskahorimaadyada hubeysan ayaa weli ah mid aad u xun, iyadoo ay sare u kacday afduubka, askareynta iyo adeegsiga carruurta.

Ciqaab la'aanta xadgudubka galmada ayaa weli ah mid walaac weyn leh. Waxaan si adag ugu boorinayaa Dowladda Federaalka in ay meelmariso Xeerka Tacadiyada Galmada, kaas oo xoojin

doona dhaqan galka sharciga isla markaana hoos u dhigaya la xisaabtan la'aanta dembiyada ka dhasha xadgudubka galmada.

Guddoomiye

Gabagabadii, dadka Soomaaliyeed waxay weli la kulmaan caqabado aan caadi ahayn. Waxay nasiib u yeesheen inay helaan Dawlad ay dhab ka tahay inay arrimahaas wax ka qabato. Furaha guusha ayaa noqon doona midnimada madaxda Soomaalida oo lala garab istaago taageerada wadajirka ah ee golahan iyo guud ahaan beesha caalamka.

Mahadsanid Guddoomiye